

XUQUUQDAADA IYO WAAJIBAADKAAGA SOO-DHAWEYNTA



Macluumaadkan adiga ayaa laguugu talagalay haddii:

- ✔ aad tahay qof weyn (kaweyn 18 sano jir)
- ✔ aad codsatay magangalyo caalami ah (sidoo kale loo yaqaan magan-galyo) gudaha Finland oo imika aad tahay codsade magangalyo caalami ah.


Waa maxay soo-dhaweyn?	3
Maxaad heli doontaa?	6
Xuquuqda daryeel caafimaad	7
Xuquuqda waxbarasho ee carruurta	10
Xuquuqda shaqo	11
Casharada luuqada iyo tababarka farsamada gacanta	12
Dhukumentigani wuxuu sheegayaa inaad tahay codsade magangalyo caalami ah	13
Halkee ayaad joogi doontaa?	13
Shuruudaha codsadaha lagu xidhi karo	-
Waa maxay waajibaadkaaga soo dhaweynta?	-
Maxaa dhacaya haddii aanad u hogaansamin waajibaadkaaga?	-
Maxaa dhacaya haddii aad u safartid waddan EU+ ah oo kale bilaa fasaxa masuuliyiinta?	-
Maxaa dhacaya marka dib laguugu celiyo dalka kale oo ka tirsan EU+ waddan ah oo aad ka tagtay bilaa fasax?	-
Waxaad ka qaadan kartaa rafcaan maamulka	-
Waxaad heli kartaa caawimo sharci	-
Faahfaahinta meelaha lagala xidhiidhi karo	-

➤ WAA MAXAY SOO-DHAWEYN?

Soo-dhaweyn waa taageerada aad heshid codsade ahaan inta aad sugaysid in masuuliyiintu soo gabogabeeyaan baadhitaanka codsigaaga magangalyada caalamiga ah. Waxa kujira xuquuqaha iyo waajibaadka lagu sharxay buug yarahan.

Finland gudaheeda, hay'adda dowladda ee mas'uulka ka ah qaabilaadda magangalyoddoonka waa Hoggaanka Socdaalka ee Finland. Sidoo kale, hay'adda ka masuulka ah baaritaanka iyo go'aan ka gaarista codsigaaga magangalyada waa isla Hoggaanka socdaalka.

Booliska ama ciidanka ilaalada xudduudka ayaa kaa codsan doona in aad xaqiijiso oo aad saxiixdo caddeyn muujinaysa in aad heshay macluumaadka ku qoran buug-yarahaan. Haddii ay jiraan wax aan kuu caddayn ama aad fahmi weydo, waxaad weydiisaa booliiska, ilaalada xudduudaha ama shaqaalaha xarunta qaabilaadda.



Waxaad ku sugan tahay waddan ammaan ah.

Inta lagu jiro joogitaankaaga, shaqaalaha xarunta qaabilaadda qaxootiga ayaa ku soo ogeysiin doona adeegyada soo dhaweynta iyo caawimada kuu diyaar ah, taasoo ku xiran hadba sida ay tahay xaaladaada.




Waxaad weydiin kartaa haayadaha kale macluumaadka iyo caawimada bilaash ah. Waxaad ka heli kartaa liiska haayadaha dhammaadka buug yarahan.




Turjubaanka ayaa kaa caawin doona la xiriirka aad u baahan tahay ee shaqaalaha, isagoo kugula hadli doona luqad fudud oo aad fahmaysid. Turjubaanku cid kale uma sheegayo wax kasta oo aad u sheegto.

Waxaad ka heli kartaa macluumaadka nidaamka magangalyada iyo shuruucda la raacayo buuga kale oo gaara.

Adigu waxaad hadda joogtaa Finland, kaasoo ah waddan ka tirsan EU+. Waddamada EU+ waa:

 27 ka Dowladdood ee Xubnaha ka ah Midowga Yurub (EU): Austria, Belgium, Bulgaria, Croatia, Cyprus, Czechia, Denmark, Estonia, Finland, France, Germany, Greece, Hungary, Italy, Latvia, Lithuania, Luxembourg, Malta, Netherlands, Poland, Portugal, Republic of Ireland, Romania, Slovakia, Slovenia, Spain, Sweden iyo

 4 waddan oo kale: Iceland, Liechtenstein, Norway, Switzerland.

Fiiro gaar ah!

Codsadayaashu waxay leeyihiin xuquuqo iyo waajibaad soo-dhaweyn oo isku mid ah dhammaan waddamada EU+ ah.

Shuruucdani waxay khuseeyaan codsashada magangalyo iyo u safrida waddamada EU+ ee kale.



Waa inaad ka diiwaangelisaa codsiga magangelyo wadanka EU+ ee ugu horreeyay ee aad timid, haddii maasuliyiintu aanay kuu sheegin wax kale.



Kaliya hal waddan oo EU+ ah ayaa ka masuul ah inuu baadho codsigaaga magangalyo. Masuuliyiinta Finland ayaa raaci doona nidaamka si loo go'aamiyo in wadan EU+ ah kamasuul yahay codsigaaga mangan-galyo.



Waa inaad joogtaa Finland gudaheeda. Uma safri kartid wadan EU+ oo kale bilaa fasaxa masuuliyiinta. Haddii aad tagtid, waxa jiri doona cawaaqib xun. Codsigaaga mangan-galyo ee Finland waa la joojin karaa. Xuquuqdaada dhaqdhaqaaqa dalka kale ayaa la xaddidi karaa oo adeegyada soo-dhaweynta ayaa la joojin karaa.

➤ MAXAAD HELI DOONTAA?

Inta ay hay'adaha dowladdu baarayaan codsigaaga ku saabsan badbaadada caalamiga ah, waxaad heli kartaa adeegyo ama taageero ku xiran xaaladdaada shakhsiyeed iyo tan dhaqaale:



• hoy



• agabka nadaafada gaarka ah



• cunto



• dhar



• lacag aad u isticmaasho kharashaadka maalinlaha ah

Haddii aad u baahan tahay lacagta qaabilaadda (vastaanottorahaa), waa in aad ka codsataa xeradaada qaabilaadda qaxootiga. Codsigaaga waa in aad ku sheegtaa caddaymaha la xiriira dakhligaaga iyo hantidaada. Shaqaalaha xerada qaabilaadda qaxootiga waxaa ay ku weydiin doonaan su'aalo, si ay si fiican ugu fahmaan duruufahaaga shakhsi ahaaneed iyo kuwaaga dhaqaaleba.

XUQUUQDA DARYEEL CAAFIMAAD

Maamulku waxay hubin doonaan inaad heshay **daryeelka caafimaad ee daruuriga ah**. Tani waxa kujiri kara tusaale, booqashooyinka kalkaaliso ama dhakhtar, baadhitaanka xanuunada darran iyo xaaladaha lala noolaado cudur, daaweynta uu qoray dhakhtar iyo caawimada caafimaadka maskaxda.



Haddii aad leedahay dhibaato caafimaad, u sheeg shaqaalaha.


Haddii aad leedahay xaalad caafimaad oo degdeg aha ama dhaawac u baahan daaweyn degdeg ah, u sheeg shaqaalaha ama wac lamabarka emerjensiga ama xaaladaha degdegga ah ee lacag la'aanta ah ee 112



Waxaa laguu qaban doonaa baaritaan caafimaad oo uu sameeyo dhakhtar ama kalkaaliye caafimaad. Waxaa ay qiimeyn doonaan xaaladdaada caafimaad, waxayna ku siin doonaan caawimada. Waxay ku weydiin doonaan su'aalo ku saabsan xaaladdaada caafimaad ee hadda ama cudurro hore oo aad soo martay, tallaallada aad qaadatay, iyo haddii ay jiraan daawooyin aad hadda isticmaalayso. Sidoo kale waxay ku weydiin karaan haddii aad qabto: dhaawacyo, xanuunno ama dhibaatooyin caafimaad, ama wax welwel ama cabasho caafimaad oo kale oo ku haya.

Waxaa lagu siin doonaa fursad aad kaga qaybgasho baaritaanka cudurrada faafa, kaas oo lagu salaynaayo qiimaynta xaaladda halista ee uu sameeyo dhakhtar ama kalkaaliye caafimaad, waxaana baaritaankan uu qayb ka yahay baaritaanka caafimaadka guud. Ujeeddada baaritaankan waa in la ilaaliyo caafimaadkaaga iyo caafimaadka dadka kale.


Waxaad xaq u leedahay inaad hesho taageero gaar ah haddii aad leedahay baahiyo gaar ah.



Wargali shaqaalahaaga haddii:

- aad dhaawacan tahay ama xanuunsanayso
- aad uur leedahay ama aad u malaynayso inaad uur leedahay
- ay kuu sugan yihiin xubno qoyskaaga ka mid ah oo u baahan caawimo gaar ah
- aad qabto naafanimo (tusaale ahaan, dhaqdhaqaaq xaddidan, maqalka oo daciif ah, ama aragga oo liita)
- aad si joogto u dareento cadho badan, welwelsan tahay ama walaacsan tahay, seexan weydo ama aad waajahayso fikirro xun
- aad la ildaran tahay dhibaato ama jirdil hore
- aad dareento inaanad ammaan ahayn, dhibtoonayso ama aad ka baqayso qof, ha ahaado qof ajnabi ah ama qof aad taqaan
- lagugu qasbay ama lagugu qasbayo inaad samayso waxyaabo aadan rabin
- aad dareento inaanad badqabin sababtoo ah diintaada, qofka aad jeceshahay, sida aad u labisato ama u dhaqanto
- aad ka yar tahay 18 jir, oo aadna timid adigoon la socon waalidkaa kaligaa ama waxaad la socotay xubno kale oo qoyskaaga ah.

Taageerada gaarka ah waxaa lagu siin karaa oo keliya, marka shaqaalaha xerada qaabilaadda qaxootiga ay ogyihiin baahiyahaaga gaarka ah.



Shaqaalaha leh takhasuska gaarka ayaa ku weydiin doona su'aalo si ay:

- u qiimeeyaan **baahiyahaaga gaarka ah**
- u aqoonsadaan **nooca taageerada gaarka ah** ee kugu habboon.

Tan waxa loo yaqaannaa **qiimaynta baahiyaha gaarka ah**.



Turjumaan ayaa kaa caawin doonaa inuu kugula xidhiidho luuqad aad fahmayso, haddii ay daruuri tahay.



Had iyo jeer la xiriiir shaqaalaha xerada qaabilaadda qaxootiga, haddii aad u baahan tahay taageero gaar ah.

Waxaad taageeradan heli doontaa illaa inta ay maamulka takhasuska leh u arkaan in aad u baahan tahay.

Waxaad aamini kartaa dhakhtarka, kalkaaliyaha iyo shaqaalaha takhasuska gaarka ah leh, oo si xoriyad ah ula hadal iyaga.

➤ XUQUUQDA WAXBARASHO EE CARRUURTA

Finland gudaheeda, dhammaan carruurta da' doodu u dhexayso 7 ilaa 18 sano waxay xaq u leeyihiin inay iskuul dhigtaan.

Waxaa ay heli karaan taageero waxbarasho, sida: koorsooyin lagu barto luqadda.



Waalidka waxaa saaran waajibka ah in ay carruurtooda ka diiwaangeliyaan iskuulka.

➤ XUQUUQDA SHAQO

Iyadoo ay ku xiran xaaladdaada, waxaad xaq u yeelan kartaa in aad ka shaqeyso Finland marka ay ka soo wareegto 3 bilood ama 6 bilood laga bilaabo maalinta codsigaaga badbaadada caalamiga ah laga diiwaangeliyay Finland.

Shaqaalaha xarunta qaabilaadda ee aad degan tahay ayaa kuu sheegi doona xeerarka iyo shuruucda la raaco Finland ee khuseeya xaqa aad u leedahay shaqada.



Si kastaba ha ahaatee, waxaa jira xaalado kuwaas laga soo reebay. Tusaale ahaan, ma lihid xaq aad ku shaqayso haddii aadan hay'adaha dowladda ula shaqayn sida loo baahan yahay, ama haddii codsigaaga magangelyada xaalado gaar ah lagu geliyo nidaamka dedejinta codsiyada (nopeutettu menettely).

Haddii aad shaqayso isla markaana aad deggan tahay xarunta qaabilaadda waxaa laga yaabaa in lagaa rabo inaad bixiso qayb ka mid ah kharashka hoyga ama degganaanshaha.



Wiilasha iyo gabdhaha da'doodu tahay 14 sano jir looma oggola in ay shaqeeyaan.

► KOORASYADA LUUQADA IYO TABABARKA XIRFADAHA

Iyadoo ay ku xiran tahay xaaladdaada, maamulku waxay kaa codsan karaan inaad ka qaybgasho:

- koorasyada luuqada,
- koorasyo ku saabsan bulshada aad la nooshahay (shuruucda, xeerarka, iyo dhaqanka)
- koorasyo aad ku baranayso xirfado cusub (tababarka xirfadaha).

Waa in aad ka qaybgasho koorasyada ku saabsan bulshada Finland.

Waxaad sidoo kale ka qaybgeli kartaa

koorasyada luuqada,

- koorasyo ku saabsan bulshada aad la nooshahay (shuruucda, xeerarka, iyo dhaqanka)
- koorasyo aad ku baranayso xirfado cusub (tababarka xirfadaha).



Shaqaaluhu waxay kugu wargelin doonaan koorsooyinkan iyo goorta aad bilaabi karto.

➤ DHUKUMENTIGA CADDEYNAYA INAAD TAHAY CODSADE ILAALINTA CAALAMIGA AH



Waxaad heli doontaa dokumentiga saxda ah, kaasoo sheegaya in aad tahay codsade badbaadada caalamiga ah. Dokumentigan wuxuu muujin doonaa magacaaga iyo xogtaada shaqsiyadeed. Waa inaad sidataa wakhti walba.

Kani ma'aha dhokumanti aad ku safri karto.

Marka aad gudbisoo codsigaaga, waxaad ka heli doontaa dukumeentiga kor lagu xusay Hoggaanka Socdaalka ee Finland. Inta aan taas la gaarin, marka codsigaaga la diiwaangelinayo, booliiska ama masuuliyiinta ilaalinta xuduudaha ayaa ku siin doona caddayn muujinaysa in aad codsiga gudbisay oo la diiwaangeliyey.

Waa in aad caddayntaas mar walba sidataa, isla markaana aad u gudbisaa Hoggaanka socdaalka marka aad si rasmi ah u gudbinayso codsigaaga.

Fiiro gaar ah! Ka taxaddar inaad lumin oo ha siin qof kale.

➤ HALKEE AYAAD JOOGI DOONTAA?

Maamulka dowladda ayaa kuu sheegi doonaa meesha aad ku sugnaan doonto waxaana ay kuu sharrixi doonaan shuruudaha la iska rabo.

Goobta aad joogi doontid inta codsigaaga magangalyo caalami ah la baadhayo waxay ku xidhan tahay arrimo badan.

Meel kasta oo aad joogtid, waxaad xaq u leedahay inaad:



- **badqabto:** qofna, xataa shaqaalaha, looma oggola inuu kuu hanjabo, caayo, ama dhibaateeyo.



- **la joogto saygaaga, xaaskaaga, carruurtaada iyo walaalahaga kayar 18 ama qaraabo qof weyn ah oo u baahan daryeel joogto ah**
- **la joogto qaraabadaada,** haddii aad tahay qof weyn oo u baahan daryeel joogto ah



- hesho caawimaad si aad **ula xidhiidhid** qoyskaaga **oo aadna isku deydo inaad raadiso iyaga, haddii aadan garanayn meesha ay joogaan.**

Waxaad soo gudbin kartaa cabasho rasmi ah haddii aad aaminsan tahay in:



- Mid ka mid ah shaqaalaha uu ku hanjabay, ku aflagaadeeyay, ama ku waxyeelleeyay.
- Haddii aad aaminsan tahay in shaqaaluhu kula dhaqmeen si sharci-darro ah ama caddaalad-darro ah.
- Haddii lagu diiday adeegyo aad sharci ahaan xaq ugu lahayd inaad hesho.

Shaqaalaha xerada qaabilaadda qaxootiga ayaa kugu wargalin doona sida aad u samaysan karto cabasho rasmi ah.

Mar walba waad weydiin kartaa maamulka, hay'adaha aan dowliga ahayn ama Xafiiska Qaxootiga ee Qaramada Midoobay (UNHCR) si aad u hesho macluumaad dheeri ah.

Hoggaanka Socdaalka ee Finland, ama xarunta qaabilaadda ayaa go'aaminaaya meesha lagu dejinayo ama hoyga aad degi doonto. Iyadoo ay ku xiran xaaladdaada, waxaa laga yaabaa inaad si xor ah ugu dhex safri karto oo ugu socon karto gudaha Finland.



Meesha aad ku hoyan doonto waxay ku xidhan tahay arrimo sida meelaha la heli karo, xaaladdaada iyo baahiyahaaga (tusaale, inta uu ka kooban yahay qoyskaagu, caafimaadkaaga).


Waxaa laga yaabaa in aad taageero iyo adeegyo heli karto oo keliya inta aad joogto hoyga lagu siiyey. Maamulka ayaa hubinaaya in aad hoygan joogto iyo inkale.

Waad dooran kartaa inaad ku hoyato guri gaar ah haddii aad haysato ilo dhaqaale oo ku filan iyo haddii maamulku aanay go'aamin inaad joogto hoy gaar ah. Xaaladdan, waxaa sidoo kale lagu oggolaan karaa in aad la joogto qoyskaaga ama asxaabtaada.

Waa inaad u sheegtaa xarunta qaabilaadda qaxootiga cinwaanka hoyga gaarka ah ee aad deggan tahay, isla markaana aad hubisaa in xaruntu ay mar walba haysato cinwaankaaga iyo macluumaadkaaga xiriirka ee ugu dambeeyay. Haddii aad deggan tahay hoy gaar ah, ma heli doontid taageero lacageed oo lagu bixiyo kirada guriga ama kharashaadka kale ee la xiriira hoyga ama degganaanshaha.



Maamulku waxa laga yaabaa in ay go'aamiyaan in aad jooqto goob juqraafi ahaan gaar ah. Xaaladdan, waxay kuugu soo gudbin doonaan qoraal ahaan luuqad aad fahmayso.



Maamulka waxaa ay go'aamin karaan in aad jooqto goobtaas si codsigaaga ilaalinta caalamiga ah loo baadhi karo si dhakhso leh, ama sababtoo ah meelaha la heli karo ee xarumaha soo dhaweynta.

Waxaad xor u tahay inaad si madaxbannaan ugu dhex safarto ama ugu dhex socoto deegaankaas.

Haddii aad u baahan tahay inaad ka baxdo goobta muddo gaaban gudahood, waxaad u baahan tahay inaad weydiiso maamulka oggolaansho. Waxaad codsan kartaa inaad ka tagto kaliya sababo qoys oo cadaalad ah, degdeg ah oo culus, ama daaweyn caafimaad oo lagama maarmaan ah oo aan laga heli karin goobta juqraafiyeed ee aad ku sugan tahay. Masuuliyiintu waxay ansixin karaan codsigaaga ama ma oggolaan karaan. Haddii codsigaaga la diido, waxaad racfaan ka qaadan kartaa go'aankan.

Iyadoo ku xiran xaaladdaada, hay'adaha dowladda waxay go'aamin karaan in lagugu waajibiyo in aad joogto xarun qaabilaadda qaxootiga oo gaar ah, islamarkaana aadan u guuri karin meel kale adigoo aan fasax haysan.



Waxaa lagu oggolaan doonaa inaad ka baxdo meeshaas gaarka ah iyadoo la raacayo xaddidaadyo gaar ah. Joogitaankaaga meeshaas gaarka ah si joogto ah ayaa loo hubinayaa.

Maamulka waxay go'aamin karaan sababo dhawr ah. Tusaale ahaan:

- waxaa jirta khatar ah inaad baxsato
- dalka kale ayaa laga yaabaa inuu masuul ka noqdo baadhista codsigaaga magangalyo, waxaana masuuliyiintu u arkaan inaad baxsato
- waxaad ka tagtay dalkaas adigoo oggolaansho haysan, waa lagugu soo celiyey, waxaana jirta khatar ah inaad mar kale baxsato.

Maamulka waxay kugula soo wadaagi doonaan go'aankan hab qoraal ah oo ku qoran luuqad aad fahmayso. Waxay kuu sheegi doonaan xuquuqdaada, waajibaadkaaga iyo cawaaqib xumada ka dhalan karta haddii aadan ixtiraamin go'aanka.

Waxaad ka qaadan kartaa racfaan go'aankan.

Waxaad weydiin kartaa maamulka haddii aad meel kale ku nagaato muddo xaddidan. Masuuliyiintu waxay ansixin karaan codsigaaga ama ma oggolaan karaan. Haddii codsigaaga la diido, waad racfaan ka qaadan kartaa go'aankan.

Fiiro gaar ah! Haddii aadan ixtiraamin go'aanka ku saabsan inaad ku nagaato meeshaas gaarka ah iyo xaddidaadaha lagugu soo rogay, isla markaana ay jirto khatar ah inaad mar kale baxsato, waa laguu xiri karaa.

➤ SHURUUDAHA CODSADE LAGU XIDHI KARO

Xadhig macneheedu waa in lagu geeyo xarun gaara oo aanad si xor ah u socon karin. Masuuliyiintu waa inay haystaan sabab sax ah oo ay kugu xidhaan. Waa inay hubiyaan in aan xalkale macquul ah laheyn xaaladaada. Booliska ama ciidanka Ilaalada xudduudka ayaa tixgalin doona xaaladaada gaarka ah kahor go'aaminta.



Sababaha laguu xidhaayo waxay noqon karaan, tusaale ahaan:

- qodobbada muhiimka ah ee codsigaaga magangalyo (tusaale, aqoonsigaaga) lama xaqiijin karo adigoo lagu hayn.
- maad ixtiraamin waajibaadka inaad joogtid goob gaara, waxaana jirta halis inaad baxsatid markale iyo masuuliyiinta oo aan kulasoo xidhiidhi karin
- waxaad heshay go'aan in laguu gudbiyo wadan kale oo EU+ ah kana masuula baadhista codsigaaga magan-galyo waxaana jirta khatar inaad baxsato ah kahor gudbinta
- waxaad keenaysaa halis amni.

haddii lagu xidho, waxaad qaadan kartaa racfaan. Waxaad codsan kartaa caawimo sharci oo bilaasha iyo matalaad.

➤ WAA MAXAY WAAJIBAADKAAGA SOO DHAWEYNTA?



Hoos waxa ah qaar ka mid ah waajibaadka ay tahay inaad u hoggaansantid.

- ✔ Raac shuruucda wadankan.
- ✔ Raac shuruucda waddankan.
- ✔ Joog Finland oo ha u safrin dal kale oo EU + ah adigoo helin oggolaanshaha maamulka.
- ✘ Haka tagin bilaa fasax goobta gaarka ah ee ay masuuliyiintu ku yidhaahdeen waa inaad degtid.
- ✔ Si dhammaystiran ula shaqee maamulka dowladda, oo raac tilmaamahooda.
- ✔ U hoggaansan xeerarka goobta aad degtid doontaan.
- ✔ Ixtiraam dadka kale ee degan, shaqaalaha iyo shakhsiyaadka kale.
- ✔ Ogeysii masuuliyiinta dowladda waxyaabaha ku saabsan hantida aad haysato
- ✔ Ku wargali *maamulka* macluumaadka ku saabsan halka lagaala soo xiriiri karo (lambarka taleefanka, iimaylka), si ay mar walba kuula soo xiriiri karaan.
- ✔ Ka qaybgal koorsooyinka waajibka ah ee ay go'aamiyeen maamulka.

➤ MAXAA DHACAYA HADDII AANAD U HOGAANSAMIN WAAJIBAADKAAGA?

Hoggaanka Socdaalka ee Finland ama xarunta qaabilaadda qaxootiga ee aad ku jirto waxaa ay qiimayn doonaan xaaladdaada, waxaana laga yaabaa in ay go'aansadaan in la yareeyo ama gebi ahaanba laga joojiyo nooc ka mid ah taageerada lagu siiyo. Haddii go'aan noocaas ah la gaaro Hoggaanka socdaalka ama xarunta qaabilaadda ayaa si qoraal ah kuu soo ogeysiin doonta, waxayna si cad kuugu sheegi doonaan taageerada la dhimay ama la joojiyay.



Fiiro gaar ah!


Waxaad heli kartaa caawimo yar, tusaale ahaan, haddii:

- Aad fasax la'aan uga baxdo aagga juqraafiyeed ama goobta gaarka ah ee ay hay'adaha dowladdu ku farayaan inaad joogto.
- Aadan wada shaqayn la yeelan hay'adaha dowladda sida sharcigu kaaga baahan yahay.
- Aad jebiso xeerarka ama nidaamka meesha aad degan tahay ama ku sugan tahay.
- Aadan ka qaybgelin koorsooyinka ama tababarrada khasabka ah ee lagaa rabo.
- Hore uga codsatay magangelyo waddan kale oo ka tirsan dalalka Midowga Yurub ama waddamada la xiriira (EU+), kadibna aad ka baxday waddankaas adigooon dhammaystirin habraaca.

Waxaad waayi kartaa caawimada aad helaysid ihaddii aad noqotid rabshadle, haddii aad u hanjabtid dadka kale ama haddii aad jabisid sharciga goobta aad adigu joogtid markasta ama si darran. Xaaladani, booliiska ayaa sidoo kale la wici karaa si ay u farogaliyaan.



➤ MAXAA DHACAYA HADDII AAD U SAFARTID WADDAN EU+ OO KALE BILAA FASAXA MASUULIYIINTA?



Finland gudaheeda:

- habraacaaga magangalyo doon waxaa laga yaabaa in la joojiyo.

wadanka EU+ ee aad u safartay bilaa fasax:

- masuuliyiintu waxay go'aansan karaan inay kugusoo celiyaan wadanka aad ka tagtay bilaa fasax

Laga bilaabo marka maamulku kugusoo wargeliyaan go'aanka lagu celinayo, waxaad waayi doontaa xuquuqaha qaarkood, tusaale ahaan:

- ma heli **doontid adeegyo badan iyo noocyo taageerada ah**
- laguuma **oggolaan doono inaad ka shaqayso**
- laguuma **oggolaan doono inaad kaqeybgashid koorasyada luuqada ama casharo lagu barto xirfado cusub.**

➤ MAXAA DHACAYA MARKA DIB LAGUUGUSOO CELIYO DALKA KALE OO KA TIRSAN EU+ WADDAN AH OO AAD KA TAGTAY BILAA FASAX?



Masuuliyiinta ayaa go'aamin kara inaad xaq u leedahay inaad joogtid goob gaara oo joogitaankaaga ayaa loo hubin doonaa si joogto ah. Waxaad awoodi doontaa inaad ka baxdo meeshaas iyadoo la raacayo xaddidaadyo gaar ah.



WAXAAD KA QAADAN KARTAA RAFCAAN GO'AANKA MAAMULKA



Haddii ay mas'uuliyiintu go'aamiyaan in ay xaddidaan xuquuqdaada codsade ahaan oo aad aamisan tahay in tani tahay cadaallad daro, **waxaad ka qaadan kartaa rafcaan go'aanka.**

Waxaad ka qaadan kartaa rafcaan haddii maamulka ay go'aamiyaan:

- uma lihid xaq hoy iyo caawimo soo-dhaweyn kale
- si loo yareeyo ama loo joojiyo caawimada soo-dhaweynta ee lagu siiyey
- waxaa la diiday codsigaagii ahaa inaad si ku-meel-gaar ah uga baxdo aagga ama meesha lagugu waajibiyay inaad ku sugnaato.
- waxa kugu waajib ah inaad joogtid goob gaara (tusaale ahaan xarun soo-dhaweyn oo gaara) oo waxaad ku bixi kartaa xannibaado kooban
- *In lagu gaynaayo xarunta haynta kummeelgaarka ah (säilöön)*

Haddii Booliiska ama ciidanka Ilaalada Xudduudaha ay ku xiraan ama ku geeyaan xarunta hayntab kummeelgaarka ah (säilöönotto), waxaad xaq u leedahay inaad racfaan ka qaadato go'aankaas adigoo u gudbinaya Maxkamadda Degmada. Racfaankaaga waa in aad u dirtaa Maxkamadda degmada. Marka lagu soo gudbiyo go'aanka, waxaa sidoo kale lagu siin doonaa hakis ku saabsan sida racfaanka loo sameeyo.

Haddii aad u safartay waddan EU+ oo kale bilaa fasaxa masuuliyiinta, oo aad wayday xuquuqo soo-dhaweyn gaara halkaasi, waxaad kaga qaadan kartaa rafcaan go'aankan dalkaasi.

Haddii masuuliyiinta Hoggaanka socdaalka ama xerada qaabilaadda qaxootiga ay go'aamiyaan inay yareeyaan ama joojiyaan caawimada soo dhaweynta ee lagu siiyey sababtoo ah xaalado lagu sharraxay bogga 16, waxaad leedahay xuquuqo gaara. Waxaad weli xaq u leedahay inaad booqato dhakhtar ama kalkaaliye caafimaad, oo aad hesho daryeel caafimaad. Sidoo kale, waxaad heli kartaa taageero xaddidan, sida cunto, kuubboon lagu bixiyo lacag ama wax lagu gato, iyo agab kale oo lagama maarmaan ah. Intaa waxaa dheer, waxaa lagu siin karaa meel aad habeenkii seexato oo ay go'aamiyaan hay'adaha dowladda.

Nooca caawimada waxay ku xidhnaan doontaa xaaladahaaga iyo baahiyahaaga gaarka ah.

Marka maamulka waddan EU+ oo aad u safartay bilaa fasax go'aamiyo inuu joojiyo caawimada soo-dhaweynta lagu siiyey, nooca caawimada aad wali heli doontaa waxay ku xidhnaan doontaa xaaladaada iyo baahiyahaaga gaarka ah.



WAXAAD HELI KARTAA CAAWIMO SHARCI



Haddii aad rabtid inaad rafcaan ka qaadatid go'aanka maamulka si loo xaddido xuquuqdaada soo-dhaweynta kahor garsoore, waxaad heli kartaa caawimo sharci oo bilaash ah iyo matalaad sharci, iyadoo ay ku xiran tahay hadba xaaladdaada sida ay tahay.

Tani waxay ka dhigan tahay in qareen ama sharciyaqaan uu ku caawin doono. Qareennadu waxay ku siinayaan kaalmo sharci marka arrintaada maxkamad la horgeeyo, waxayna difaacaan xuquuqdaada iyo danahaaga. Sidoo kale, waa dad madaxbannaan oo aan hoos imaan hay'adaha dowladda ama garsooraha.

Waxaad sidoo kale codsan kartaa in aad la tashato qareen ama la-taliye sharci oo aad adigu kharashkiisa iska bixiso.



Shaqaalaha xerada qaabilaadda qaxootiga ayaa kusoo ogeysiin doona sida looga qaato rafcaan go'aanka

Waxaad markasta weydiin kartaa masuuliyiinta, haayadaha aan dawliga ahayn ama UNHCR wixii macluumaad muhiima, oo ay kujiraan caawimada sharci iyo matalaada bilaashka ah.

FAAHFAAHINTA HALKA LAGALA XIDHIIDHAYO

Haddii aad qabtid wax su'aala ama aad u baahan tahay taageero inta lagu jiro joogistaada, waxaad la hadli kartaa shaqaalaha ka tirsan:

maamulka soo-dhawaynta 44

Xaruntaada qaabilaadda xerada qaxootiga	
--	--

maamulka kale ee la xidhiidha

Macluumaad guud oo ku saabsan qaabilaadda magangelyoddoonka iyo habka codsiga magangelyada	Migri.fi Infoblinland.fi
--	-----------------------------

maamulka kale ee la xidhiidha

Hoggaanka Socdaalka	PL 10, FI-00086 Maahanmuuttovirasto, iimayl: migri@migri.fi
---------------------	---

Waxaad sidoo kale laxidhiidhi kartaa ururadan, si aad u hesho su'aalaha la xidhiidha:

taageerada caafimaad



Lambarka gurmadka faafimaadka 116117 wuxuu ku siinayaa talo iyo hagitaan ku saabsan dhibaatooyinka caafimaad ee degdegga ah. Wac lambarkan haddii aadan la xiriiri karin xarunta qaabilaadda ee aad degan tahay.

taageerada bulsheedka



Mieli (Suomen Mielenterveys ry), mieli.fi, ururka qaabilsan arrimaha la xiriira caafimaadka maskaxda

latalin sharci, kaalmada iyo matalaada



Caawimaadda sharci waxaa bixiya xafiisyada caawimaadda sharciga (oikeusaputoimistot), xafiisyada qareennada (lakitoimistot) iyo qareennada ama sharci yaqaannada (juristit). Haddii aad doonayso macluumaad dheeraad ah oo ku saabsan qareennada ama dadka bixiya adeegyada sharciga ah, waxaad weydiin kartaa xaruntaada qaabilaadda qaxootiga ee aad degan tahay ama wakiilkaaga.

Oikeuspalveluvirasto.fi/yhteystiedot

UNHCR (Haayada Qaxoontiga ee Qaramada Midoobay)

waxay ilaalisaa danaha iyo xuquuqaha magangalyo doonka iyo qaxoontiga.



Xafiiska UNHCR ee gobolka ee kuugu dhow waa:
UNHCR (Hay'adda Qaramada Midoobay u
qaabilsan Qaxootiga)

Cinwaanka: Wenner-Gren Center, Sveavägen 166,
113 46 Stockholm, Sweden

Iimayl: swest@unhcr.org

Wakiilka sinnaanta iyo
caddaaladda

PL 24, FI-00023 Valtioneuvosto, iimeyl: yvv@oikeus.fi,
www.syrjinta.fi

Haddii ay dhacdo in adiga ama qoyskaagu idinkoo jooga meel ka baxsan halka aad degan tihiin oo aad shil la kulantaan ama aad halis gashaan, waxaad wici kartaan lambarka gargaarka degdega ah ee lacag la'aanta ama bilaashka ah ee **112**.

QORAALLADAYDA GAARKA AH



Co-funded by
the European Union



Buug-yarahan waxaa loogu talagalay ujeedooyin macluumaad oo keliya. Keligii ma abuuru xuquuq ama waajibaad. Hay'adda Midowga Yurub ee Magangalyada (EUAA) ayaa bixisay qaybta ugu weyn ee agabkan, waxaana EUAA ay u oggolaatay oo keliya Waddamada Xubnaha ka ah EU in ay koobiyo ama wax ka beddelaan buug-yarahan. EUAA ma qaadayo wax mas'uuliyada ama xil ku saabsan saxsanaanta, nuxurka, dhammaystirnaanta, sharcinnimada ama kalsoonida macluumaadka ku jira buug-yarahan ee ay bixiyeen Waddamada Xubnaha ka ah EU ama dhinac saddexaad oo mas'uul ah. EUAA iyo cid kasta oo ku shaqaysa magaca EUAA midna mas'uul kama aha isticmaalka laga yaabo in laga sameeyo macluumaadka ku jira buug-yarahan.

© Hay'adda Midowga Yurub ee Magan-galyada, 2025